



CLINIQUE BRISTOL ROSE

Ma lagugu sameeyay gudniinka fircooniga ah mise ma taqaan qof lagu sameeyay?

Waxaad la hadli kartaa xarunta caafimaadka si kalsooni buuxda leh.

Bristol Community Rose Clinic waxay taageertaa haweenka lagu sameeyay gudniinka fircooniga ah. Taas waxa kale oo loo yaqaan gudniinka ama goynta dumarka iyo ereyada kale sida sunnada, gudniinka, xalaalayska, taxuur, megrez iyo khitan.

Xarunta caafimaadku waxay siisaa haweenka fursad ay kaga hadlaan baahiyahooda caafimaadka jidhka iyo maskaxeed ee la xidhiidha gudniinka fircooniga ah iyagoo lagu qaabili doono meel asturan oo ixtiraam badan.

Adeegan takhasuska leh waxaa bixiya koox dumar ah oo aqoon u leh dhibta gudniinka fircooniga ah. Waliba waxaan kuu heli karnaa turjubaano dhanka taleefanka ah waxaana sidoo kale kuu diyaar ah dad u doodda daryeelka caafimaadka oo diyaar ah marka la codsado. Waxaad soo kaxaysan kartaa saaxiib kuu tarjuma ama ku taageera waana la soo dhawaynayaa.

Xarunta Rose waxay leeyahay lataliye u go'an oo ka hadla arrimaha la xiriira latalinta. Dhamaan ballamaha xarunta waa kuwo sir ah oo cid kale loo sheegin.

Waxaan siinnaa adeeggan dhammaan haweenka da'doodu ka weyn tahay 18 jir ee ka diiwaangashan GP-ga Bristol.

Wac halkan: 07813 016 911


Email: bnssg.bristolrose.clinic@nhs.net

Xarunta Caafimaadka ee East Trees

(East Trees Health Centre)

100a Fishponds Rd

Bristol BS5 6SA



ARRINTAN WAA MID SIR AH OO LAGUU XAFIDAY